

"Gabayga, Doqonta yow sheega!" W/C/ Xasan Cabdulle Calasow ?Shiribmaal?



Gabagaan magiciisa waxaa la yiraahdaa: "Doqonta yow sheega!" Wuxuuna la hadlayaa Kooxda caadaysatay Gumaadka Ummadda Soomaaliyeed ?Ugus? macnaha iyo maamooryada uu gudbinayo, is la gabayga ayaad ka dhex heli doontaa ee ka bogasho wacan:1. Shiinka gabayga sheekada wanqalan, Shaqalka dhowr nooca 2. Shibbanaha higgsaade shirane, Kuu sharrixi doono 3. Shicir waa murtiyo shaacinteed, Hadal la sheelaaye 4. Shaybiyo ninkii oday ahbaa, Sheegiyo garane 5. Shax loo dhigo ayuu leeyahay, Shilal la saaraaye6. Shuhub iyo xumaa laga jiraa, Shuqul la eedaaye7. Sheekiyo duxbaa lagu daraa, Shaafin aadmiga'e.8. Afartaas sha'di gabayga iyo, Sheeda xiriddii dheh 9. Shaqadii Abwaan lagu yiqiin hadal, Shib-shaashkii dheh 10. Afar kalena aan sheelka dhigo, Waa sharciya kheyre.11. Shucuuba adduunyada ku nool, Qoloba sheed taale 12. Waa shan qaaradood oo is xiga , Shaxanka muuqaale 13. Qolo weli shuruuc gaara iyo, Shuqul ayaw yaale14. Shuruud lagu yaqaanna jirtiyo, Shoobka dhaqankooda15. Annaguna Shareecada allaa, Shiishku noo yahaye 16. Shuhub iyo xumaan laguma daro, Shiinka xarafkeede17. Wax kastoona shaashayn karaa, Shabaq ka saarnaaye18. Shirqool inaan yeelayn dadkoow, Doqonta yow sheega.19. Shaqaaqada insaankaya haddaan ,Sheego dhibaheeda 20. Shaalkaya haddaan suunka furo, Shawrsho taladayda 21. Amasaan intaan shuushka tiro, Turubka shaandheeyo 22. Shiishkaya gammuunkana ka rido ,Qaansa shagax dheera 23. Shaamarreerka aan muujiyo, Shiilo taladayda24. Sharwadahana aan gaar u dhigo, Shaacsho xumihisa25. Gobonnimaa shan dhalad heliye, Doqonta yaw sheega26. Shaambaay ninkii ku addimaan, Meel fog shiish dhigine 27. Shab-shablaha waxa loo tumaa, Waa hiddaya sheege 28. Shujaacnimadu waa ruuxa naca, Shiilka nololeede29. Shaqa qaran ninkii shubah galee, Raadna lagu sheego30. Sheelaha waxaa loo dhigaa, Waa ha shuush baxo'e 31. Showr dheerya sheekaan soceyn, Been la shacarreeyay32. Shahaaddada la diidaya ku waan, Eebbe sharafaynin33. Shubahaad Iblis iyo jinkiyo, Kii insiga sheegtay34. Haddii qaar shiraacdaba ku kale, Waa kan shaaximane 35. Sheekadi Abkoow Aadan iyo ,Xaawo sharafaydi 36. Ilaa kuwa shirkada sheegtayoo ,Shalaya maantaana 37. Intaaseey adduunyadu shidneyd, shabaqna soo yiile 38. Shanfarood lahaa looga dhigay, Cadawya sheeydaane 39. Shabshab inaanayn yeelayn mar kale, Doqonta yaw sheega.40. Afartaas sha'di gabayga iyo, Sheeda xiriddii dheh 41. Shaqadii Abwaan lagu yiqiin hadal, Shib-shaashkii dheh 42. Afar kalena aan sheelka dhigo, Waa sharciya kheyre.43. Shabaabkaya haddii laysku daro, Shaqada gaaloo dhan 44. Shisheeyahana lagusii kordhiyo, Shurugya beenaale 45. Rabbi uma shafecece horeey, Qarankan shiileene 46. Shamsadiyo habeenkay shiraan, Dhiigna shubayeene 47. Asey sharafti duulkani lahaa, Shalaw ka tuureene 48. Waa shisilis shiinahaan qabsaa, Sheegtayoo kaliye49. Shillankuba inow geed lab yahay, Doqonta yow sheega.50. Shan jir ceel ka heesee yiraa, Geeli waan shubaye51. Shabaq gool ku laadee haddana, Sharad ku qaadaaya52. Orga shuluqsanee aar libaax ,Sheeddi kala gooyay53. Waa duni sha'nigu badanyehee, Doqonta yow sheega.54. Sharaf dhaca ayaa laga jiraa, Nabad nin sheegtaaye 55. Sheeydaanaa adeegsaday siyuu, Naar u shuumbiyo'e56. Iyaguna ma sheegtaan asay, Shacabki laayeene 57. Shaqadeey mushaar li'i qabtaan, Doqonta yow sheega.58. Afartaas sha'di gabayga iyo, Sheeda xiriddii dheh 59. Shaqadii Abwaan lagu yiqiin hadal, Shib-shaashkii dheh 60. Afar kalena aan sheelka dhigo, Waa sharciya kheyre.61. Shuqul xuma waxaa daah u furey, Shuqubti reer Luude62. Shaaribkay ku xirteen wixii gobi, Ka sheexdaaye63. Shallaay laguma waaree alla, Shaahid ku ahaaye64. Inay Diintu shay qaala tahay, Doqonta yow sheega.65. Shan Haweenna idinkoo dilee, Qarax ku shaameelay66. Shuftana aad ku sheegteen kolleey, Waa adduun shidane67. Shiika dheerya kooxdisu waa, Shacab ibliiseede68. Kusa shaaci maayee Allaan, Shaafi leeyahaye69. Inuu shaqalku qayb gaaban yahay, doqonta yow sheega.70. Inaad shuur dhexdeed seexatiin, Sidi shabeel doola71. Shaki ruuxa uu idinka galoo, Shaarac lagu loogo72. Shareecada islaamkana tiraa, Shiiqueed

aniga ah73. Hadba shiin kitaab kuma qorne, Doqonta yow sheega.74. Toban sano haddeey shiil waddeen, Sheeka kaligooda 75. Oo aysan shaac bixin welina, Shacabkii diidaayo76. Shaqanay ku daaleen asaan, Shilin la sii haynin77. Inay sheeka-baraleey wadaan, Doqonta yow sheega.78. Afartaas sha'di gabayga iyo, Sheeda xiriddii dheh 79. Shaqadii Abwaan lagu yiqiin hadal, Shib-shaashkii dheh 80. Afar kalena aan sheelka dhigo, Waa sharciya kheyre.81. Inay qolana waa shiiq dhahaan, Qolana sheeyddaamo82. Qolaneey sharaab siinayaan, Qolana shaambuugga83. Qolanay shafiiq waa marshaan, Qolana waa shaahid84. Qolanay shancaaniga ibtelo, Qaraxa loo shiilo85. Shan kun ruux haddii aad disheen, Shaharya maalmoodhin86. Shareecada Ilaahay sidaa, Laguma sheegayne87. Shaqal ruuxi leexshaa inow, Naar ku shubi doono88. Shaafici Riyaal iyo Maraam, Iyo Shujaacooda89. Shaqad iyo Buruuj iyo Baqaro, Diinta sharafleeya90. Shar gudbane wixii shaqal is dheer, Nabigu noo sheegay(S.C.W.).91. Al-shucraad ku aragtiin haddana, Kuma shaqeysiine92. Inow shiishku wada saaran yahay, Doqonta yow sheega.93. Quraanshaduba waa uun sharriban ,Sheelna wada yaale94. Shuraakana inay wada yihiin, Boqorku noo sheegye95. Shuruudaha hadday buuxiyaan, Noole wow sharafe96. Shillaabiyo Jigjiga iyo ilaa, Gudinka Shiilaale97. Shalaamboodya Ceeldheer, Ilaa shuurta Haramaanyo98. Shaf garaacid waa nagu dileen, Shoob aan damaheyne 99. Sharraxay tumeen laga tagyee, Doqonta yow sheega.100. Afartaas sha'di gabayga iyo, Sheeda xiriddii dheh 101. Shaqadii Abwaan lagu yiqiin hadal, Shib-shaashkii dheh 102. Afar kalena aan sheelka dhigo, Waa sharciya kheyre.103. Shaabbaad heshiisiin inaad, Sharaf la noolaato104. Adigoo u shaaxuur sadee, Geliyay sheeddaada105. Annaad shiiqi kuu xiri lahaa, Shuufid ku arkeeyso106. Shaki li'i waxaad eersataa, Waa shuhuud maqane107. Shacab aan ku rabin lama qasbee, Doqonta yow sheega.108. Shiinkeeda maansada haddaan, Shicirka soo qaydo109. Amasaan shibbiyo gabaygu waa, Sheeda dheer yahaye110. Shiilitaanka looxaya mihii, qalinku shiish gaabsho111. Shaacirrada gabyaa,ehe Ilaah, Shiinka baray waayo112. Iyagaa halkii aan shid dhigo, Noo sharrixi doona!FG: Halabuuradda doonaya inay sii ballaariyaan waa u furan yahay, waase inaanu macnaha iyo Xarafkaba ka baxsanayn. Wixii talo iyo turxaan bixin ah ama sii tebin waxaad igala soo xariiri kartaa ciwaannadaan hoos ku qoran.Cuute23@hotmail.comShiribmaal@gmail.comLaashin77@gmail.comDagaalka Suugaanta ee Al-Shabaab. W/C/ Xasan Cabdulle Calasow ?Shiribmaal?